

## **AMARKA Lamb. 7.**

### **MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOMALIYA**

### **MAAMULAHA**

KADIB markii la arkay dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee lamb. 2357 ee 9 Diseembar 1952;

IYADOO la tixgeliyey aragtida in la soo saaro xeer nidaamiye khuseeya hantida maguurtada ah;

IYADOO la tixgeliyey qod. 4 ee Caddeynta Mabaa'diida Dastuuriga ah oo ku lifaaqan Heshiiska Maamulka Dhulka Somaliya ee hoos yimaday Maamulka Walaayada Talyaaniga;

IYADOO la tixgeliyey qod. 8 ee Heshiiska Maamulka Walaayada Dhulka Somaliya ee hoos tagtay Maamulka Walaayadda Talyaaniga;

IYADOO la tixgeliyey qod. 4 ee dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda lamb. 2357 ee ku taarikhsan 9 Diseembar 1952;

#### **WAXAA LA AMRAY:**

##### **Qod. 1**

Waxaa la as aasay Buugga Keydinta Somaliya oo lagu qori doono hantida magurtada ah ee jasuurka ah iyo kuwa magaaloooyinka ku yaala si loo xaqijiyo xuquqda lahaanshaha iyo xuquuqyada kale ee ka soo arooray shurucda iyo dhaqaamada.

Dhisidda, Iibsashada , wax ka bedelka ama in la waayo xuquuqdasi waxay bilaaban karaan oo keliya markii lagu qoro Buugga Keydinta.

##### **Qod. 2**

Haddii aanan la soo saarin amarro dheeraad ah, Buugga Keydinta waxaa lagu diwaan gelin karaa oo keliya hanti iyo xuquuqda hantilayaasha shaqsyaadka ama hey'adaha gaarka loo leeyahay.

Waxaa reeban in lagu qoro hantida margurtada ah oo hey'adaha diiniga ah ama kuwa dhaqanka laga leeyahay.

##### **Qod. 3**

Gobol kasto waa in laga dhisaa Xafiiska Hantida.

Garsooraha Gobolka ayaa madax ka ah Xafiiska Hantida.

Waxaa laga abaabuli kara Xafiiska Hantida goobaha kale oo muhimka ah.

Waxaa lagu keydin doona xafiiska karaaniga ee Garsooraha nuqulka qoraallada go'aanada kama dambeysta ah iyo qorallada kale si loo fuliyo amarkaan sharchiyeed.

##### **Qod. 4**

Ciddii dooneyso in ay ku diwaangeliso hantidiisa ma gurtada ah sida ku xusan qod. 1 iyo 2 ee Buugga Keydinta waa in uu codsi qoraal u geeya Madaxa Xafiska Buugga Keydinta ee goobta uu joogo.

##### **Qod. 5**

Madaxa Xafiska Buugga Keydinta kadib markii uu guddoomo codsiga ku qorista hantida wuxuu ku soo bandhig doona qoraal ogeysiis ah aftka Talyaaniga iyo midka

Carabiga ah deegaan uu ku yaalo hantidaasi ama luuqada Somalida iyo wax kasto ee dhaqan ahaay isgaarsiinta fududeyn karo.

Ilaa iyo 3 bilood ee lagu daabacay ogeysiiska waxaa ciddii dood ka qabto ka doodi karaan in aan lagu qorin Buugga Keydinta.

Muddadas haddii la dhaafo, Madaxa Xafiisa Buugga Keydinta wuxuu amri doona in la soo kormeero hantida, halkaas oo loogu yeeri doono cidda dooda ka keenay iyo hantileyaasha deriska la eh.

#### **Qod. 6**

Kadib markii uu soo kormeero goobta ay ku taalo hantida maguurtada ah, Madaxa Xafiiska Buugga Keydinta oo uu la jiro Qaadi iyo Khabir wuxuu go'aan ka gaari doona arjiga diwaan gelinta.

#### **Qod. 7**

Go'aanka Madaxa Xafiiska Buuga Keydinta waxaa la ogeysiin doona ciddi keentay arjiga diwaan gelinta iyo ciddi ka soo horjeesatay.

Waxaa rafcaan loo qaadan karaa Maxkamadda Somaliya go'aanka Madaxa Xafiiska Buugga Keydinta muddo 60 beri gudahooda.

Go'aanka kama dembeysta ah waxaa lagu soo bandhig doomaaFaafinta Rasmiga ah ee Somaliya iyadoo kharaj faafintaasi u dhiibi doono ciddii arjiga kensatay ama ciddi ka soo horjeesatay.

#### **Qod. 8**

Garsooraha markii uu go'aanka ka gaarayo dacwooyinka refcaanka sid ku qoran qod. 7 waxa kaalmo uu ka heli doonaa Qaadi iyo khabiir kuwaas leh awoodda codeynta.

#### **Qod. 9**

Madaxa Xafiska Buuga Keydinta wuxuu awood u leeyahay fulinta go'aanka kama dambeysta ah.

#### **Qod. 10**

Maamulaha Guud wuxuu soo saari doona dekreeto la xiriirta fulinta amarsharcigaan gaar ahaan xeerarka khuseeya habka diiwaangenta dambe, kuwa la xiriira keydka, canshuurada ka soo aroora diiwan gelinta iyo kuwa ganaaxa haddii la dhibi waayo waajibaadka.

#### **Qod. 11**

Dekreetadaan wuxuu caddeyn doonaa taarikhda ay ka bilaaban doonto waqtiga ay arjiga diwaan gelinta laga bilaabi doono ee hantida maguurtada ah.

Muqdishu, 18 Maarso 1955

Maamulaha Guud  
**Martini**